# Macluumaad ku saabsan safarrada caafimaadka

Warbixin loogu talagalay bukaan socodka iyo qaraabadooda.




Region Sörmland

Buuggan yar waxaad ka heli kartaa sharciyada la xiriira afarrada caafimaadka.
Sharciyadu waxay khuseeyaa qof kasta oo ku nool oo ka diiwaangashan Gobolka Sörmland oo haysta dhalashada Iswidhishka, ama ku leh jinsiyada waddan kale oo heshiis kula jira Iswiidhan. Sharciyadu waxay sidoo kale khuseeyaan magangelyo-doonka, dadka aan sharciga lahayn iyo dadka is-qariya.

## Siyaabo kala duwan oo loogu safro daryeelka caafimaadka

- Baabuur si gaar loo leeyahay
- Bas
- Tareen

Haddii sababo caafimaad dartood aanad keligaa ugu safri karin baabuur gaar ah, bas ama tareen, waxaa jira fursad aad ku raaci karto gaadiidka guud ee dadweynaha ee gaarka ah.
Xaaladaada caafimaad ayaa go'aamisa sida laguu oggolyahay inaad u safarto, oo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa mas’uul ka ah inay qiimeeyaan. Haddii aanu jirin gaadiid guud oo dadweynaha xaq laguuma siinayo inaad isticmaasho gaadiid guud ee dadweyne ee gaarka ah.

Haddii laguu oggolaado safar caafimaad, daryeelka caafimaad ayaa qori doona warqadda xaqiijinta safarka caafimaadka. Dadka u baahan ilaalin caafimaad waxaa loo gudbiyaa in lagu qaado ambalaas.

Si aad awood ugu yeelatid inaad ka dalbato safarka bukaanka Xarunta laga dalbado (Beställningscentralen), warqadda safarka bukaanka ee ay qoreen shaqaalaha daryeelku waa in loo gudbiyaa qaybta Socdaalka caafimaadka (Sjukreseenheten) ugu dambayn saddex maalmood ka hor booqashada la qaoreeyey.

## Kharashka safarka baabuur gaar loo leeyahay iyo gaadiidka guud ee dadweynaha

### Gudaha Gobolka Sörmland

Safarrada gobolka gudihiis waxaa lacagta sharashka laguu soo celinayaa markaad ugu yaraan sagaal (9) kulan ay ku daaweyso hal xarun caafimaad inta lagu jiro mudda 90 maalmood oo isku xiriirsan.

### Ka baxsan gocolka Sörmland

Safarrada ka baxsan gobolka waxa kharashka laguu soo celinayaa marka aad haysato warqad tixraac oo ay soo gudbisay qayb takhasus ah oo ka socota Gobolka Sörmland.

Gobolka wuxuu bixinayaa qayb ka mid ah safarka, adiguna waxaad leedahay qayb ka mid ah oo aad adigu bixinayso. Sidoo kale, waxaad heli kartaa magdhow haddii aad buuxiso shuruudaha safarka ee sida gaarka ah u khuseeya gaadiidka guud ee dadweynaha ama aad leedahay adeegga gaadiidka dadka naafada ah laakiin aad ku safarto baabuur si gaar ah loo leeyahay.

## Safarka lagu aado xarunta degdegga ah ama qaybta dhalmada

Waxaa lagu siinayaa qayb ka mid ah kharashka safarka markaad adeegsato baabuur si gaar ah loo leeyahay ama taksi oo aad ku aado xarunta degdegga ama qaybta qaabilaadda dhalmada ee kuugu dhow. Haddii aad ku safarto adigoo isticmaalaya baabuur si gaar ah loo leeyahay, waxaa lagu siinayaa lacagta inta mayl ee meeshu jirtay oo laga jarayo khidmadda aad adigu bixinayso. Haddii aad ku safarto taksi, waxaanu bixin doonaa kharashka safarka, oo laga jarayo khidmadda aad adigu bixinayso.

## Daryeelka caafimaadka degdega ah ee ka baxsan gobolka

Kharashka safarka waxa lagu bixiyaa oo loogu talagalay qaybta gargaarka degdega ah ee kuugu dhow ee gudha gobolka aad ku sugan tahay. Safarka soo laabashada waxa loo soo celinayaa meeshii uu safarka caafimaadku ka bilaabmay.

Adiga ayaa bixinaya oo mas'uul ka ah safarka aad ku tegeyso cinwaanka aad ku diiwaangashan tahay, lagumana dalban karo Xarunta laga dalbado (Beställningscentralen).

Haddii aad ku safarto adigoo isticmaalaya baabuur si gaar ah loo leeyahay, waxaa lagu siinayaa lacagta inta mayl ee meeshu jirtay oo laga jarayo khidmadda aad adigu bixinayso. Haddii aad ku safarto taksi, waxaanu bixin doonaa kharashka safarka, oo laga jarayo khidmadda aad adigu bixinayso.

## Sidee ayaad u dalban kartaa magdhow?

**1177.se**

- Ku gal 1177.se aqoonsiga bangigaaga (bank-id)
- Adeegyada kale waxaad ka heli doontaa safarka caafimaadka - codsiga magdhowga safarka caafimaadka
- Ku lifaaq rasiidhada booqashooyinka
- Ku lifaaq tigidhada iyo rasiidhada safarka tareenka/baska
- Haddii aanad haysan aqoonsi bangi, waxaad codsigaaga noogu soo diri kartaa boostada

Waxaad codsan kartaa lacagta safarka ee 12 bilood oo la soo dhaafay oo keliya. Lacagta magdhowga ka hoosaysa 100 kr lama bixiyo.

Taa beddelkeeda waxaad isku soo ururin kartaa lacago dhowr ah oo badan oo si guud iyagoo isku jira ayaa laguugu soo diri karaa. Khidmad ayaa laga qaadi doonaa lacag la bixinayo oo aanay wakhtigeedii hayn, taas oo keeni karta in wixii uu qofku isku soo uriryey wax aan ahayn in loo soo celiyo. Adiga ayaa masuul ka ah inay xogtu sax tahay. Haddii kale, waxaa laga yaabaa inaad lacag dib u soo celiso.

## Daryeelka iyo daaweynta la baajiyo

Haddii aad lahayd kharash safar daryeel caafimaad ah ama ay ahayd in lagu daaweeyo uu baajiyey daryeel bixiye caafimaad, qaybta daryeelka ay khusayso ayaa bixisa kharashka safarka.

## Gaadiidka guud ee dadweynaha ee gaarka ah, ee safarka caafimaadka

Had iyo jeer hayso gacanta ku hayso macluumaadka soo socda si aad u sheegto markaad dalbanayso safarka:

- Tobanka lambar (personnummer)
- Lambarka telefoonka
- Waqtiga aad u baahan tahay ee kugu haboon
- Cinwaanka saxda ah ee meesha lagaa qaadayo/lagu geynayo
- Xog ku saabsan qofka ku raacaya ama rakaabka kale oo kula safraya
- Haddii ay jiraan boorsooyin iyo wax la mid ah

## Sidan u dalbo safarka

- Ka wac Xarunta dalabka lambarka telefoonka: **020-44 40 00**
- Waad dalbansan kartaa ama joojin kartaa safarkaaga habeen iyo maalinba
- Soo sheeg waqtiga ay qaadanayso cinwaanka aad tegeysaa. Hubi inaad haysato waqti dheeraad ah si aad ugu gaarto booqashadaada caafimaadka
  Daryeelka caafimaadka ee la sii qorsheeyay, wakhti fiican sii ballanso safarkaaga, si kastaba ha ahaatee, ugu yaraan 14 maalmood ka hor maalinta safarka si kastaba ha ahaatee, ugu yaraan 14 maalmood ka hor maalinta safarka
- Waa muhiim inaad diyaar u tahay inaad bixdo markuu baabuurka yimaado

Safarka waxaa la waafajinayaa rakaabo kale, sidaas darteed waqtiga safarka iyo sugitaanka way saameyn kartaa. Safarka waxaa lagu sameyn karaa baabuur si gaar ah loo leeyahay ama gaadiid khaas ah oo leh qalab leh meel sagxad ah iyo albaab hooseeya.



## Kharashka aad adigu bixinayso

Waa kharash aad adigu bixinayso. Waxa laga jarayaa lacagta adiga lagu siinayo waxaana lagu dari doonaa kharashka ilaalinta kharashka sare ee safarrada caafimaadka (högkostnadsskyddet). Waxaa laga xisaabinayaa oo laga bilaabo maalinta ugu horeysa ee safarka iyo 12 bilood oo soo socda.

Khidmadaha aad adigu bixinayso, heerarka magdhowga lacagaha iyo ilaalinta kharashka sare (högkostnadsskyddet) waxaa go'aamiya Hogaamiyeyaasha Gobolka sanadkiiba mar marka la ansixiyo himilooyinka iyo miisaaniyada. Safarka caafimaad ee aad u isticmaalayso baabuur si gaar ah loo leeyahay waxaa lagu bixiyaa lacagta kiiloomitirk ahaan iyadoo la raacayo heerka uu dejiyay xafiiska canshuuruhu. Khidmaddaha gaar ah ee uu qofku bixinayo ee la go'aamiyay waxaad ka heli karaa bogga www.1177.se/sormland/sa-fungerar-varden/sjukresor-och-fardtjanst/sjukresor-i-sormland/.

## Qof wehel ah

Qofka ka weyn 18 sano ee u baahan qof ku weheliya safarka sababo caafimaad awgeed, waa in had iyo jeer ay ku ansixiyaan shaqaalaha daryeelka caafimaadku warqadda safarka caafimaadka ama ogolaanshaha adeegga gaadiidka gaarka ah. Tani waxay khuseysaa safarka aad adigu iskaa isku debereyso iyo safarka adigoo isticmaalaya gaadiidka guud ee dadweynaha ee gaarka ah. Markaad gasho-ama ka baxdo istibaalka, safarka qofka wehelka ah waxa la soo celinayaa lacagta haddii hore loogu sii xaqiijiyey warqadda socdaal caafimaad oo keliya.

Carruurta da'doodu ka yar tahay 18 sano waxay had iyo jeer xaq u leeyihiin in qof raaco iyadoo aanay wax kharash ku noqon marka ay ku safrayaan gaadiidka guud dadweynaha iyo gaadiidka dadweynaha khaaska ah.

Gobolka Sörmland waxa uu ogolyahay hal qof oo keliya inuu wehel noqdo. Haddii loo baahdo caawimo dheeraad ah, qofkaas waxaa loo tixgelinayaa inuu yahay rakaab kale oo wuxuu bixinayaa kharashka safarka.

## Hoyga ka baxsan gobolka

Haddii aad u baahato hoy, waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto qaybt soo gudbisay ee daryeelka caafimaadka Gobolka Sörmland booqashada ka hor. Qaybta soo gudbisay ee daryeelka caafimaadka waxaa looga baahan yahay inay soo qoraan warqad xaqiijin ah.

Tani sidoo kale waxay khuseysaa hoyga qofka kuu raacaya. Waxaad bixineysaa kharashaaga gaar ah ee ku saleysan inta habeenada ee aad joogto. Markaad ka baxdo hoyga kadib, waxaa lagu soo dirayaa kharashkii kugu baxay. Kharashka ma ku jirto ilaalinta kharashka sare (högkostnadsskyddet). Gobolka ayaa bixinaya kharash ah hal qol lacagtii, qeybta intaa ka badan ee kharashka waxaa bixinaya qofka bukaanka naftiisa.

- Qoka jiran ee ka weyn 18 sano: Qofka ku raacaya wuxuu bixinayaa qeybtiisa ee qolka laba qof deeqaya ee hoteelka
- Qofka jiran ee ka yar 18 jir: Hoygu waa bilaash qofka jiran iyo qaraabadiisa

## Safarrada aan la oggolaan ama lacagtooda dib loo soo celin

### Safarrada la xiriira:

- Daryeelka caafimaadka ee ka hortagga ah
- Tallaalada
- Daryeelka caafimaadka shirkadaha
- Safarka guriga marka laga baxo qaybta degdegga- ama qeybta qaabilaadda dhalmada
- Safarka guriga haddii ay dhacdo xanuun degdeg ah oo gobol kale ah
- Oggolaanshiyaha fasax oo qofku isagu doortay in la siiyo
- Xulashada daryeelka caafimaadka ee xorta ah (xorriyadda doorashada) iyo xulashada qalabka caawinta ee xorta ah (xorriyadda doorashada)
- Gudbinta guud ee daryeelka meel ka baxsan gobolka oo laga helo isbitaal, xarun caafimaad, takhtar gaar ah ama dhakhtarka indhaha
- Daryeel bixiyeyaasha caafimaadka ee gaarka ah ee aanu  Gobolka Sörmland heshiis la lahayn
- Safarrada ka baxsan Iswiidhan
- Marka rasiidhada, tigidhada tareenka/baska aan lahyn/maqan yihiin
- Safar taksi ah oo lagu aadayo daryeelka caafimaad oo la sii qorsheeyey oo aan laga dalban xarunta dalabka (beställningscentralen)
- Kharashaadyada baarkinka iyo kharashyada meela ciriiriga ee baabuurta lama soo celiyo (trängselavgifter)

## Xarunta dalabka (beställningscentralen)

Xarunta adeegga gaadiidka dadweynaha ee Gaarka ah
Telefoonka **020-44 40 00** waxay furan tahay si loo dalbado habeen iyo maalinba

## Qaybta safarada daryeelka caafimaadka (sjukreseenheten)

Sjukreseenheten
Mälarsjukhuset
631 88 Eskilstuna

Telefon: 0155-24 73 57
Telefontid: vardagar 9.30-11.30, 13.00-14.30

E-post: sjukreseenheten@regionsormland.se

Macluumaad dheeraad ah:

regionsormland.se/sjukresor

*Codso lacagta magdhowga ee safarka caafimaadka*

Region Sörmland

Sjukreseenheten januari 2025